



Office Telephone: 252 2 517269/ 252 24112633/252 2 4409125/25224481219

E-mail: shuro4rights@gmail.com

Hargeisa, Somaliland

Ref/SHURO-Net/ 0300 /07

Date: 30/07/07

Ujeedo: Xukuumada Somaliland & Tacadiyadda Xuquuqda muwaadiniinta oo maraaya heerkii ugu sareeyay

Isku-xidhka heer qaran ee ururada xuquuqda aadamiga Somaliland (SHURO-Net) waxay si xoogan u cambaaraynayaan ficiladda laf jabka ku ah xuquuqda aadamaha iyo xoriyadaha aasaasiga ee ay caadaysteen hawl-wadeenada xukuumada Somaliland tan iyo markii uu xilka la wareegay madaxwayne Daahir Riyaale Kaahin.

Falalka ku tacadiga xuquuqda aadamaha oo si isdaba jooga uuga dhacaayay dalka Somaliland sanadihii la soo dhaafay ,ayaa kii uugu dambeeyay wuxuu haleelay masuuliyiinta urur siyaasadeedka qaran, maaliniminaddii shalay sabsabtidii 28 July 2007, abaaro 9:00 subaxnimo.

Ciidanka bilaysku oo u horkacaayay taliyaha bilayska Somaliland Maxamed Dubad Saqadhi ayaa xabsiga madheera u taxaabay masuuliyiintii urur siyaasadeedka qaran ,masuuliyiintaas oo la rumaan gareeyay todoba maalmood, ayaa waxaa ay kala ahaayeen, Gudoomiyaha ururka qaran ,Maxamad Cabdi Gaboose,Gudoomiye ku xigeenka 1-aad Maxamed Hashi Elmi iyo Jamaal Caydiid.

Isku-xidhka ururada xuquuqda aadamaha Somaliland waxa uu u arkaa hawlgalkan lagu xidhxidhay masuuliyiinta qaran mid sharci darro ah oo lagu dagdagay isla markaana dhaawacaysa dimiuraadiyada curdinka ah iyo nidaamka xisbiyada badan taa soo ay ku hanaqaaday Jamhuuriada Somaliland.

Sida ay xogogool u yihiin ururada xuquuqda aadamiga Somaliland waxa lagula kacay masuuliyiinta ururka qaran xadgudubyo isugu jira cagajuglayn,hanjabaad iyo xadhig sharci darro ah kuwaa soo baalmarsan destoorka dalka iyo baaqyada caalamiga ah ee xuquuqda aadamiga.

Isku-xidhka ururada xuquuqda aadamiga Somaliland iyagoo tixraacaya qodobka 9 ee destoorka, faqradiisa 1aad oo odhonaaya Nidaamka siyaasadeed ee Jamhuuriyadda Somaliland waxa saldhig u ah nabad, talo-wadaag, dimuqraadiyad iyo hannaanka xisbiyada badan, iyagoo maanka ku haya qodobka 23 faqradiisa 3aad oo cadaynaysa in la isu aboobuli karo ururo siyaasadeed, iyagoo fiirinaaya qodobka 1aad ee xeer I/r,14/2000 oo qeexaya waxa loola jeeda xisbi iyo urur waxa aanu si cad uuga soo horjeednaa tacadiga loo gaystay masuuliyiinta ururka qaran taa soo lafjab ku ah

xuquuqda muwaadiniinta, si fududna u dhaawici karta sumcada iyo aqoonsiga Somaliland.

Isku-xidhka heer qaran ee ururada xuquuqda aadamiga Somaliland iyagoo adeegsanaaya qodobka 21 ee destoorka, faqradiisa 1aad oo ku amraya golayaasha dalka inay ilaaliyeen xuquuqda muwaadiniinta, iyagoo aaminsan qodobka 127 ee destoorka kaa soo aan ogolayn in wax laga badalo qodobada destoorka ee ka hadlaaya xuquuqda muwaadiniinta, iyagoo raacaya qodobka 20 ee baaqa caalamiga ah ee xuquuqda aadamiga, iyagoo ka duulaaya qodobka 22 ee heshiiska caalamiga ah ee ICCPR kaa soo dammaand qaadaya is abaabul iyo xorriyada shakhsiga ,ayaa waxaanu cambaaraynaynaa xadhigii sharci darrada ahaa ee lagula kacay madaxda urur siyaasadeedka qaran, waxaanan uugu baaqaynaa xukuumada Somaliland inay si dhakhso ah xorriyadoodii uugu soo celiyaan .

Isku-xidhka ururada xuquuqda aadamiga Somaliland wuxuu uugu baaqayaa xukuumada inay ilaaliso xuquuqda muwaadiniinta isla markaana ka fogaato waxkasta oo keeni kara inuu dib u dhac ku yimaado doorashooyinka loogu talagalay inay ka dhacaan Somaliland sanandkan aakhirkiisa.

Isku-xidhka heer qaran wuxuu ka codsanayaa xukuumadda Somaliland inay si dhakho ah u siidayso masuuliyiinta ururka qaran, laguna xaliyo wixii khilaaf ah ee jira wada hadal iyo isafgarad.

Ugu dambayntii waxaanu ku boohinaynaa shacbiwaynaha reer Somaliland inay ilaashadaan amnigooda kana feejignaadaan wixii dhib u keeni kara amaanka iyo kala dambaynta dalka jamhuuriyada Somaliland.

Mubarik Ibrahim Aar

Agaasimaha SHURO-Net